Somttb 0930, Soft-Scripted on18 02-2019 by SOMTTB. Schedule for airing on 19-07-2019

## SOMALI VOICE OF NEW ERA PROGRAM NO 0930
## THE BOOK OF DANIEL CHAPTER 5:10-31

Halkani waa raadiyo Transworld oo idinku soo dhowaynaya barnaamij tafsiir ah oo soconaya muddo nusa-saac ah. Waxaana barnaamijkan Codka Waayaha Cusub ee waxbaridda ah idiin soo diyaariya Masiixiyiin Soomaali ah, waxaana laga maqlaa barnaamijkan habeenka Isniinta ilaa iyo habeenka jimcaha, saacaddu markay tahay 7:25ka fiidnimo, mawjadda 31ka miterband.

**OPENING SINGNATURE TUNE UP 25 SEC. AND UNDER.**

Mar kale ayaannu dhegaysatayaal idinku soo dhowaynayaa barnaamijka, waxaannu horey idiinku sii wadaynaa daraasaadka aynu ka soo xiganayno kitaabka qoduuska ah ee aynu ugu magac-darnay, **'Dhex-marka Kitaabka Qoduuska ah.'** Waa barnaamij aad ku baranaysaan kutubta Babaylku uu ka kooban yahay, haddii ay ahaan lahaayeen kuwii Axdigii Hore iyo kuwa Axdiga Cusub.

Waxaa caaway horey u sii soconaya kitaabkii Daaniyeel oo qayb ka ah kutubta Axdigii Hore. Saddex siyaabood baa noloshii Daanyeel loo qiimeeyaa, waxaana weeye inuua ahaa nin leh ujeeddo, iyo inuu ahaa nin salaadeed iyo inuu ahaa nebi dadka u sii sheega waxyiga imanaya wakhtiga fog. Mid ka mid waxyiyadaas ayuu nebigu leeyahay, sida ku qoran kitaabkii Daaniyeel 12:4, **".....Kuwo badan baa hore iyo dib u roori doona, aqoontuna waa kordhi doontaa."** Miyaanay haddaba aqoonta banii-aadmigu haatan si xawli badan u sii kordhaynin?

**SONG: REEL—CUT----**

Markii noogu dambaysay dhegaysatayaal waxaannu soo barannay ninka la yiraahdo Belshaasar. Waxaanan soo

ogaannay inuu ahaa ninka labaad ee boqortooyada. Waxaa boqor ka ahaa Aabbihii Nebonidaas reer Baabuloon xilligiisii, waxaana loo malaynayaa in Aabbihii ku maqnaa daafaha ama dacallada shishe ee waddanka halkaasoo malaha uu difaac kaga jiray.

Wiilkiisiina wuxuu difaafad u sameeyey raggii saraakiisha ahaa, oo wuxuu bilaabay in koobabkii dahabka ahaa ee Yeruusaalem laga soo bililiqaystay inuu khamri ugu shubo naago addoomo ah iyo raggiisii saraakiisha ahaa. Wakhti yar dabadeed ayaa waxaa ku soo degay xugun, oo qolladdii ay ku shirsanaayeen gidaar ka mid ah ayaa waxaa lagu soo qoray far aan la aqoon, waxaana loo yeeray reer Kaldayiin, iyana way ku guuldarraysteen inay boqorka u sheefaan fasirka qoraalkaas isaga ah.

Farxaddoodiina waxay isla daqiiqaddiiba isku beddeshay cabsi iyo wel-wel, oo waxaa bilowday muusanow.

Haddaan qoraalka halkii idiinka sii wado dhegaysatayaal ayaannu imminkana eegaynaa baalka 1116 ee  Axdigii Hore, kitaabka Daanyeel 5:10, waxaana qorniinku leeyahay sidatan:

**"Markaasaa boqorka iyo saraakiishiisii hadalkoodii aawadiis ayaa boqorraddii u soo gashay gurigii diyaafadda; kolkaasay boqoraddii hadashay oo tidhi, Boqorow, weligaaba noolow; fikirradaadu yay kaa argagixin, wejigaaguna yuusan cabsi beddelmin."**

Boqoraddii baa imminka boqorka u soo gashay, waa xaaskii Nebukadnesar. Waxay maqashay wixii ka dhacay xafladda, waxaanay doonaysaa inay boqorka la taliso, bal taladiidii ayaannu imminkana idiinka kahriyeynaa isla kitaabka Daanyeel 5:11, waxaana Qorniinku leeyahay sidatan:

**"Nin ruuxii ilaahyada qoduuska ahu ku jiro ayaa boqorotooyada jooga, oo jeerkii aabbahaa ayaa waxaa laga helay nuur iyo waxgarasho iyo xigmad u eg xigmaddii ilaahyada; oo Boqor Nebukadnesar oo ahaa aabbahaa, boqorow, wuxuu isaga ka dhigay madaxdii saaxiriinta, iyo xiddigiyayaasha, iyo kuwa reer Kaldayiin ah, yo kuwa wax sheega."**

Waxay boqoradda waayelka ahi leeyahay, **"Nebukadnesar oo ahaa aabbahaa."** Haddaba taasu waxay u dhacaysaa ama ay noqon kartaa in Nebu-kadnesar ahaa ninkan awowgii. Ha yeeshee u dhici mayso inuu ahaa oo keliya Aabbihiisii dhalay, laakiin wuxuu kaloo noqon karaa kii uu ka soo farcamay ama awowgiisii saddexaad. Weli waxaannnu bartamah akaga jirnaa qisadan ka dhacaysa guriga boqorka e, waxaannu idiin akhriyeynaa 5:12, waxaana Qorniinku leeyahay sidatan:

**"Maxaa yeelay, waxaa laga helay ruux aad u wanaagsan iyo aqoon, iyo waxgarasho, riyooyinkana wuu fasiri jiray, waxa daahanna wuu muujin jiray, shakigana wuu saari jiray, oo kaasu waa Daanyeel, kii boqorku uu bixiyey Eelteshaasar. Hadaba Daanyeel ha loo yeedho, oo isna fasirka wuu caddayn doonaa."**

Boqoraddan waayeelka ah waxay u timid inay gacan ka geysato khaakhuulkan ku yimid boqortooyada oo waxay doonaysaa in wiilkeeda la caawiyo. Sida abbaarta ah waxay Beelshaasar u ahayd ayeeyo. Waxay u sheegaysaa inuu boqortooyada joogo ninka la yiraahdo Daanyeel, oo ay ku tilmaantay inuu ahaa nin ruuxya Ilaah ku jiro, oo bya tiri, riyooyinkana fasira, oo awoodna u lahaan kara inuu riyada fasiro.

Waxaannu markaa dhegaystayaal imminka soo gaarnay maaddada khusaya ama ku saabsan:

## DAANYEEL OO BOQORKA KU CELINAYA HADIYADDIISII

Haddaan arrinkaas ka tixraacno kitaabka Qoduuska ah ayaannu la soo kala baxaynaa baalka 1116 ee Axdigii Hore, kitaabkii Daanyeel 5:13-14, waxaana qoran sidatan:

**"Markaasaa Daanyeel la soo hor taagay boqorka. Boqorkiina waa la hadlay oo Daanyeel ku yidhi, Ma waxaad tahay Daanyeelkii ka mid ahaa kuwii Yahuudah laga soo dhacay, oo boqorkii aabbahay ayaa Yahuudah kaa keenay? Waxaa la iiga kaa sheegay inuu ruuxa ilaahyadu kugu jiro, oo lagaa dhex helay nuur iyo weaxgarasho iyo xigmad aad iyo aad u wanaagsan."**

Daanyeel waxaa la soo hortaagay boqorkii Baabuloon, ama aan iraahdo boqor-xigeenka. Waxaa suuragal ah in isaga dhinac laysaga riixay markii Nebukadnesar dhintay oo xukunka iyo waxa dhacayana aanu warba u haynin, oo waxaaba suuragal ah sida muuqata in Daanyeel aan lala tashan jirin wixii ka dambeeyey xukuumaddii Nebukadnesar. Haddaan qisada halkii idiinka sii wadno ayaannu imminkana eegaynaa 5:15-16. Waxaana qorniinku leeyahay sidatan:

**"Haddaba raggii xigmadda lahaa iyo xiddiggiyayaashii baa lay soo hor taagay inay fartan akhriyaan, oo ay ii caddeeyaan fasirkeeda, laakiin way kari waayeen inay ii caddeeyaan waxaas fasirkiisa. Laakiinse waxaa la iiga kaa sheegay inaad wax fasiri kartid, shakigana saari kartid; haddaba haddaad farta akhriyi kartid oo aad fasirkeeda cayddayn kartid, waxaa laguu xidhi doonaa dhar guduudan, waxaad qooortana ku qabi doontaa silsilad dahab ah, oo waxaad noqon doontaa taliyaha saddexaad oo boqortooyada."**

Haddaba Beelshaasar wuxuu sasabayaa Daanyeel, oo wuxuu ku dhiirro-gelinayaa inuu hadiyado siin doono haddii uu sheego wixii ay garan waayeen reer Kaldayiin, waxaana loo sheegay isna in uu noqon doono ninka saddexaad ee boqortooyada. Haatan Daanyeel waxaa loo ballanqaaday hadiyad la mid ah kuwii loo ballanqaaday saaxiriinta. Haddaan imminkana jawaabtii nebi Daanyeel ka eegno Qorniinka ayaannu imminka eegaynaa aayadda 17aad, waxaana Qorniinku leeyahay sidatan:

**"Markaasaa Daanyeel jawaabay oo yidhi isagoo boqorkii hor taagan, Boqorow, hadiyadahaaga iska hayso, abaalgudyadaadana ku kale sii; habase yeeshee farta waan kuu akhriyi doonaa, fasirkana waan kuu caddayn doonaa."**

Daanyeel hadiyaddii boqorka ayuu ku celiyey, oo waxay u muuqataa inuu si qalafsan ula hadlayo Beelshasar. Waxaanay ila tahay haddaanu boqorku naxsanayn wuu garan lahaa in diidmada hadiyadda ay isaga cay ku tahay. Daanyeel uma baahna hadiyadda ninkan dhallinyarada ah? Xitaa haddii jagadaas la siiyo wakhti gaaban un buu haysan lahaa, oo kuma intifaaceen sidaannu arki doonno.

Haddaba Daanyeel khudbad ayuu u soo jeediyey Beelshaasar taasoo ahayd khudbad aan weligii loo sheegin ama aanu maqal iyadoo kale intii uu aabbihii hoos joogay. Daanyeel imminka nin dhallinyaro ah maahan, wuuna odayoobay, oo wuxuu Daanyeel leeyahay sida ku qoran 5:19, waxaana Qorniinku leeyahay sidatan:

**"Boqorow, Ilaaha ugu sarreeyaa wuxuu aabbahaa Nabukadnesar siiyey boqortooyada, iyo weynaan, iyo ammaan, iyo derejo, oo weynaantii uu siiyey aawadeed**

**ayay dadyowgii iyo quruumihii iyo kuwii kala afka ahaa oo dhammu la gariireen oo ka cabsadeen. Kuu doonayay wuu dilay, kuu doonayayna wuu reebay, oo kuu doonayey wuu sarraysiiyey, kuu doonayayna wuu hoosaysiiyey."**

Nebukadnesar wuxuu ahaa hoggaamiye xoog leh oo wax walibana way u ahaadeen. Waxaan rumaysanahay inaanu jirin nin isaga lagu masaali karo, oo nin la mid ah isagana dunida lagama heli doono ilaa kan Masiixa mucaarada uu yimaado. Waxaana Daanyeel u meerinayaa ama xifdisiinayaa Beelshaasar sidii Ilaah ula macaamilooday awowgii Nebukadnesar.

Ilaah baa isaga carshiga siiyey, wuxuuna hoos keenay boqortooyin fara badan oo dunida ka jiray waagaas. Wuxuu imminkana u sheegayaa Beelshaasar khibradihii iyo xiisadihii Nebukadnesar la soo gudboonaaday sida ku qoran 5:20-24, waxaana qorniinku leeyahay sidatan:

**"Laakiinse markuu dhulka kor isaga qaaday oo ruuxiisii kibir la qallafsanaaday ayaa carshigii boqornimadiisa laga dejiyey, ammaantiisiina waa laga qaaday. Markaasaa binu-aadmiga laga eryay, qalbigiisiina waxaa laga dhigay sida kan dugaagga, wuxuuna la joogay dameeraha duurka, oo wuxuu doogga u daaqay sida dibida, jidhkiisana waxaa qoyay dharab samada ka soo dhacay ilaa uu ka ogaaday in Ilaaha ugu sarreeyaa u taliyo boqortooyada dadka, oo uu madax uuga dhigo ku alla kii uu doonayo."**

**"Beelshaasaraow, adigoo wiilkiisii ah, ma aadan is-hoosaysiin in kastoo aad waxyaalahan oo dhan ogayd; laakiinse waad iska sarraysiisay sayidka samada; oo waxaa lagu hor keenay weelashii gurigiisa, markaasaa adiga iyo saraakiishaada, iyo**

**naagahaaga, iyo naagahaaga addoommaha ahu aad khamri ku cabteen; oo waxaa ammaantay ilaahyada lacagta iyo dahabka ah, iyo kuwa naxaasta, iyo birta, iyo qoryaha, iyo dhagaxa ah, oo aan waxba arkin, waxna maqlin, waxna ogayn; oo Ilaaha neeftaadu gacantiisa ku jirto oo jidadkaaga oo dhan lehna ma aadan ammaanin; dabadeed gacanta isaga xaggiisa laga soo diray, oo waxay qortay fartan."**
Daanyeel si la yaab leh ayuu ugu faaqiday Beelshaasir wixii qabsaday awowgiis Nebukadnesar, welibana awowgii wuxuu ahaa hoggaamiye awoodi u sugnaatay oo cid is-hortaagi kartayna ma lahayn. Welibana wixii uu yiraahdo ayaa shaqayn jiray. Haddaba markii Nebukadnesar ay badraddu ka buuxsantay waa la hoosaysiiyey. Wuxuu markaa hadalka arar uga dhigayaa sida ninkan Beelshaasar ah loo hoosaysiin doono. Waayo isagu wuu ka sii xumaa Nebukadnesar. Waxaa suuragal ah inuu horey u maqlay wixii awoowihiisii hore sameeyey, ha yeeshee kuma waana-qaaan, waxaana nebigu u meerinayaa taariikhda ka hor intaanu xukunku ku dhicin.

Ilaah wuxuu xukun dusha ka saaraa oo keliya kuwa fursadda u hela inay maqlaan eraygiisa haddana is-moogaysiiya oo aan dan ka gelin. Nebukadnesar iyo qoyskiisa oo dhanba waxay heleen fursaddaas, oo waxay wada arkeen wacdarihii iyo la yaabkii ka dhacay Baabuloon, haddaan lagu waana-qaadan kolleyba xukun wuu imanayaa. Haddaba kuwa la khiyaamayn dono marka wakhtigu dhammaado waa kuwa diida iftiinka ha yeeshee garanaya hadallada nuurka leh. Bawlos ayaa wuxuu leeyahay sida ku qoran Warqaddiisii labaad ee reer Tesaloniika 2:9-12, waxaana Qorniinku leeyahay sidatan:

**"Kaas imaatinkiisu waa sida shuqul Shayddaan oo leh xoog iyo calaamooyin iyo cajaa'ibyo been ah oo dhan, iyo khiyaanada xaqdarrada oodhan. Waxaana leh kuwa lumaya maxaa yeelay, waxay diideen inay runta jeclaadaan oo ay sidaas u badbaadaan. Oo sababtaas daraaddeed ayaa Ilaah ugu soo diraa wax qalad kaga dhex shaqeeya si ay been u rumaystaan, in kuwa aan rumnta rumaysan, laakiinse xaqdarrada ku farxay, kulligood la wada xukumo."**

Waxaa haddaba la barayaa Beelshaasar qaynuunka iyo nidaamka Ilaah ku shaqeeyo. Qaynuunkaasu waa kii Ilaah horey u caddeeyey, oo Ciise Masiixna wuxuu leeyahay sida kuq oran Injiilka sida Yooxanaa u qoray 5:43, waxaana qoran sidatan:

**"Waxaan ku imid Aabbahay magiciisa, idinkuna waad i aqbali weydeen. Haddiise mid kale magaciisa ku yimaado, kaasaad aqbalaysaan."**

Haddaba markii kuwo badan oo Soomaali ah ay diideen Hadallada qoran ee Injiillada sanaddadii lixdameeyadii ayaa waxaa loo keenay Hantiwadaagga Cilimiga ku dhisan. Markaasay aqbaleen, waayo mid waliba ee Ilaah dhabarka u jeediyey, wax kale ayaa u qarsoon, oo waa khasab in labada daarood mid qofku galo. Nin Soomaali ah oo abwaan ah ayaa isagoo wiilkiisa la talinaya ku soo gabagabeeyey tixdii gabayga ahayd, **"Xag un labada daarood ku daran, hays-xabakin meele."**

Ninkii Ilaah diida wuxuu aadayaa ama ka qayb qaadanayaa asnaam-caabud, oo Beelshaasarna markii uu diiday Ilaaha Samada ee awowgii saldanada siiyey ayuu bilaabay inuu xurmeeyo oo darajeeyo diimo qalaad oo ku dhisan ama aasaaskoodu yahay asnaamta. Waxaana isagii ku soo degay xukun, waayo sanamku wax

nool maahan oo markii aad u qayshato ku samatabbixin maayo. Ugu dambayntii Daanyeel wuxuu u sheegay Beelshaasar in fartan meesha ku qoran ay xag Ilaah ka timid. Imminkana aynu eegno maaddada khusaysa:

## DAANYEEL OO MACNAYNAYA FARTII LAGU SOO QORAY DAARTA GIDAARKA DAARTA BOQORKA.

Haddaan markaa arrinkaa ka tixraacno qorniinka ayaannu dhegaystayaal imminkana la soo kala baxaynaa kitaabkii Daanyeel, baalka 1117 ee Axdigii Hore 5:25, waxaana qoran sidatan:

**"Oo waa tan fartii la qoray, Mene, Mene, Teqel, Uufarsiin."**

Haddaba ninkii aan garanaynin fasiraadda wax kale ayey la noqonaysaa, haddaan horey idiinku sii wadno meeriska ayaannu eegaynaa haddaba aayadda xigta ee 26aad, waxaana qoran sidatan:

**"Waa kan waxaas fasirkiisii;Mene, waxay ka dhigan tahay, Ilaah waa tiriyey boqortooyada, wuuna dhammeeyey."**

Mene ayaa waxay noqonaysaa "Tirsi", waxaanay ka macne tahay in Ilaah xisaabay boqortooyada Baabuloon. Waxaana soo kor-maray tirsigooda ama numbarkooda, oo waa wakhtigii ay tegi lahaayeen. Haddaba addoonkii Rabbiga ee Muuse ahaa ayaa wuxuu leeyahay: **"Na bar inaannu tirinno maalmaha Cimrigayaga si aynu ku helno qalbi xigmad leh."**

Haddaba tirada ama xisaabta wakhtiga-yaga Ilaah un baa garanaya, oo goorta numberkeenna dusha uu imanayo, oo noloshayada adduun ay dhammaanaysana Ilaah keliya un baa og. Weli waxaannu horey idiinku

sii wadaynaa meeriska cutubkan 5aad waxaanan eegaynaa dhegaystayaal aayadda 27aad, waxaana Qorniinku leeyahay sidatan:

**"Teqelna waxaa weeye, kafadaha waa lagugu miisaamay oo waxaa kaa dhinnaaday."**

Haddaba macnaha Teqel waxaa weeye **"culays".** Baabuloon ayaa waxaa la saaray miisaanka Ilaah, oo waxaa la ogaaday, inay miisaankii ama heerkii Ilaah doonayey ay ka gaabisay. Waxaa ku qoran kitaabka Muujintii cutubyada labaad iyo kan saddexaad wax ku saabsan toddobada kiniisadood ee Aasiyada yar.

Waxaanan halkaas ku arkaynaa in Sayid Ciise Masiix qalab ka mid ah kuwii oolli jiray macbudka oo ah laamad sidaha ama shumac sidaha 12ka god leh. Qalabkaasu wuxuu lahaa 12 god mid walibana waxaa lagu shubi jiray saliid, markaasaa la daari jirey oo wuxuu ifin jiray inta ka dhex leh meesha qoduuska ah iyo qoduuska qoduusyada. Qalabkaas 12ka god leh oo loo yaqaanno Lampstand, ayaa u taagan kiniisadda, Ciise Masiixna waa kan sifeynaya kiniisaddiisa, oo ka bixinaya waxmatarayaasha, iyo kuwa aan miraha soo bixinin, iyo weliba kuwa jillaafada u dhigaya wehelnimada masiixiyiinta.

Waxaa rasuul Bawlos oo ka hadlaya maaddada kala shaandhaynta iyo kala sifaynta, ayaa wuxuu leeyahay sida ku qoran Warqaddii reer Rooma 3:21-23, waxaana Qorniinku leeyahay sidatan:

**"Laakiin haatan sharciga la'aantii ayaa xaqnimadii Ilaah la muujiyey, waxaana u marag furay sharciga iyo nebiyadii, Waxaana weeyaan xaqnimada Ilaah ee lagu helo rumaysadka xagga Ciise Masiix oo u ah in alla inta rumaysata oo dhan, waayo, kala duwanaan ma leh. Maxaa yeelay, dhammaan way wada dembaabeen**

**oo dhaadi waayeen ammaanta Ilaah."**

Haddaba Ilaah wuxuu miisaamaa ficillada dadka oo dhan, waxaana soo baxday in dhammaan la wada dembaabay, oo la gaadhi waayey ammaanta Ilaah. Maaddaama ninkan Beelshaasar ah la miisaamay, oo ay u soo baxday inaanu gaarin heerkii Ilaah ka doonayey ayaa imminka waxaa ku soo dhacaya inkaar oo waxaa warinaya nebi Daanyeel, waxaana qorniinku leeyahay sida ku qoran kitaabkii Daanyeel 5:28, waxaana qoran sidatan:

**"Boqorow, Ilaaha ugu Sarreeya wuxuu aabbahaa Nebukadnesar siiyey boqortooyada, iyo weynaan, iyo derejo."**

Haddaba sida qonriinku leeyahay boqortooyadii Baabuloon waxaa kala qaadanaya oo qaybsanaya reer Maaday iyo reer Faaris. Waxaa marka dhinaca kale laga eego haatan meesha ka baxaya madaxii dahabka ahaa. Haatan waxaa xukunka qabsanaya boqortooyadii masaalkeedu ahaa naxaasta, inta ka hoosaysa madaxii dahabka ahaa ee Nebukadnesar ku arkay ekaantii uu ku riyooday. Haddaba taasina waxay muujinaysaa in Ilaah ugu sarreeyo boqortooyooyinka dunida ood han. Yexesqeel ayaa wuxuu leeyahay sida ku qoran 21:27, markaasoo nebigu lahaa: **"Anigu waan afgembiyi, oo afgembiyi, oo afgembiyi doonaa iyada, oo mar dambena siima ay ahaan doonto, ilaa uu yimaado kan xaqa u lahu, oo isaga ayaan siin doonaa."**

Haddaba afgembigu wuu sii socon doonaa Ilaah Masiixu yimaado. In sidaas la yeelana way wanaagsan tahay, maxaa wacay kelitaliyayaashu waxba ma hambeeyaan haddii loo daayo inay dal xukumaan. Ha yeeshee Ilaah wuxuu xukunkii ka qaaday sanaddadii la soo dhaafay macangagiin waaweyn, sida Stalin, Hitler iyo

Mussolini.
Waxaa haddaba taasu muujinaysaa in Ilaah amarka leeyahay, oo Masiixuna waa dhagaxa dhagaxa lagu soo tuuray ekaantii Nebukadnesar oo kala burburisay ekaanta sida ku qoan kitaabkii Daanyeel 2:34, waana kan boqortooyadiisa dunida ka taagi doona maalin maalmaha ka mid ah. Haddaan horey idiinku sii wadno dhegaystayaal meeriska cutubka 5aad, ayaannu eegaynaa imminka aayadda 29aad waxaana qorniinku leeyahay sidatan:

**"Markaasaa Beelshaasar amar bixiyey, oo waxay Daanyeel u xidheen dhar guduudan, qoortana waxaa loo geliyey silsilad dahab ah, markaasaa la naadiyey inuu noqonaya taliyaha saddexaad oo boqortooyada. Haddaba mar kale ayaa waxaa la leeyahay "Taliyaha Saddexaad."**

Markaa waa dhab in Beelshaasar ahaa taliyaha labaad, oo kitaabka Daanyeelna waa mid ku taagan xaqii'iqa. Nabonidas ayaa bil-xaqiiqa ahaa boqorka, Beelshaasar, oo uu awoowe u ahaa Nebukadnesar, ayaa isna noqday qafkii labaad ee u sarreeyey boqortooyada. Haddaan soo gunaanadno kitaabka ayaannu dhegaystayaal imminkana idiin akhriyeynaa 5:30-31, waxaana qoran sidatan:

**"Habeenkaasaa la dilay Beelshaasar boqorkii reer Kaldayiin. Oo Daariyus oo ahaa reer Maaday o laba iyo lixdan jir ahaa, ayaa boqorotooyadii qabsaday."**
**SONG: REEL---CUT-----**

Halkani waa TWR, Idaacadda TWR oo idinku leh Ilaah haydin barakeeyo oo haydinku anfoco wixii aad caaway ka maqasheen barnaamijka. Waxaa barnaamij kan oo kale ah ka maqli-doontaan habeen dambe (hadahan oo kale) isla mowjaddan 25ka miterban. Haddiise aad

doonaysaan inaad fikirkiinna ka dhiibateen wixii aad caaway maqasheen ayaad nagala soo xiriiri kartaan somtwr@twr.co.ke.
Waxaad kaloo waraaqaha noogu soo qortaan: P.O.Box 21514, oo koodku yahay 00505. Waxaa kaloo aan idin siin doonaa website aad ka maqashaan barnaamijyadeenna Soomaaliga ah, si kuwiinna doonaya inay koorasyo ka qaataan Baybalka ay ugu hirgasho.

**SIGNATURE TUNE UP 6 AND UNDER**

Halkani waa TWR oo idiin rajaynaya Habeen Baraare iyo barwaaqaba leh. Inta aynu ka gaari doonno wakhti aynu ku kulanno Barnaamij la mid ah kan caaway aad maqasheen, waxaan idinku leenahay nabadda Ciise Masiix, ha idiinku badato xagga jidhka iyo ruuxaba Aamiin